



Barnaamijka shayga iyo qalabka ka tirsan kombuyuutarka – waxyaalo gaar ah oo lagu kordhiyay shuruudaha amaahda

- Barnaamijka shayga iyo qalabka la socda kombuyuutarka waxaa amaah ahaan loogu bixiyaa qalabka caawinaadda ah ee ka yimid hey'adda ka mas'uulka ah daryeelka caafimaadka.
- Barnaamijyada horay loogu soo shubay waa inaan la taaban maadaama barnaamijyada qalabka caawinaadda ee horay ugu jiray aysan la shaqayn (la falgelin) barnaamijyada oo dhan. Soo dejinta barnaamijyada ama qalabka kombuyuutarka waa inaad kala tashatid cidda kusoo qortay.
- Adiga ayaa mas'uul ka ah inaad internet ku xirtid iyo/ama ku xirtid khadadka maxaliga ah ee xogta ku keydsan kombuyuutarka.
- Adiga ayaa ka mas'uul ah amniga kombuyuutarka qalabka caawinaadda, tusaale ahaan xafidida, diffaaca fayruska iyo ka ilaalinta in la jabsado.
- Markii loo baahdo caawinaad ama dayactir, la xiriir ciddii kusoo qortay. Daryeel caafimaad bixiyaha ayaa bixinaya kharashka caawinaadda iyo dayactirka ka dhasha isticmaalka caadiga ah ee quseeya qalabka caawinaadda lagu qoray. Adiga ayaa iska bixinaya cilladda ku timaadda taxadar la'aan ama dayac tusaale ahaan inuu qofku soo degsaday barnaamij markii qof kale isticmaalay kombuyuutarka.
- Barnaamijyada shayga, lambarka rukhsadda, waraaqaha sida loo isticmaalayo iyo qalabka la socda qalabka caawinaadda lagu qoray waa in loo xafido qaab amni ah waana inay la socdaan markii qalabka caawinaadda lasoo celinayo.

Waxaa go'aamiyay guddiga wada shaqaynta qalabka caawinaadda 2010-06-28

Waxaa dibu cusboonaysiin lagu sameeyay buugga tixraaca kooxda diyaarinta iyo noocyada 2015-08-31

Dibu cusboonaysiin lagu sameeyay buugga tixraaca kooxda diyaarinta iyo noocyada 2018-09-04 (wax ka beddel tifatir)